SOMALISKA

Härnösands kommun

# Kusoo dhawoow Xannaanada



Xili xiiso leh ayaa ku sugaya hadda marka uu cunugaada bilaabayo xannaanada, Xiliga xannanada waa inuu noqdo xasiloono, waxbarasho iyo farxad. Waxaa rajeynayna inaad adi iyo cunugaada ku qanacdaan xannaanada



En förskola i världsklass

# Xannaano heer sare ah

Xanaanooyinka degmada ee Härnösand waxuu hafadkeenu yahay inaa ka dhigno xannaanooyin heer sare ah.

Annaga ka shaqeeya xannaanooyinka:

- Waxaa isticmaalnaa qaab waxbarida filasoofiyeed ee Reggio Emilias. Taas oo ah inaan caruurta u aragno inay muhuumad uleeyihiin bulshada ayna uqalmaan in hadalkooda la dhagaysto. Waan qiimeynaa kala duwanaan shaha, waxaana u aragna inay si hanti la mid ah ay goobta u yihiin.
- Waxaan caruurta ka caawinaa barashada iyo horumarka luuqado badan. Sida bilicda iyo dareenka aragtiyeed ee cunugu isticmaalayo markuu waxbaranayo iyo qaabka uu dunida u fahmayo. Waxaa kalo oo aan luuqad ahaan u aragnaa aaladaha digitaalka, waxanaa shaqadeena ka mid ah barida aqooneed ee digitaalka.
- Kala duwanaanshaha waxaa u aragnaa wax wanaagsan, ku hadalka luuqadaha badana waa wax fiican. Waxaa ka shaqeyna sidii carruurta luuqadoodu hooyo aysan aheyn af swiidhiska, ay ubaran lahaayeen luuqadoodo hooyo iyo mida af swiidhishka.
- Markii aan shaqeynayo waxaa isticmaalna nidaamka axdiga xaquuda carruurta.

När ditt barn börjar i förskolan

# Marka cunugaadu uu bilaabayo xannaanada

Adi iyo cunugaadaba waxay noqon kartaa maalin dareen leh maalintaa kowaad ee aad cunuga xannanada ugu soo tageysid. Sidaas darteed ayaa waxaa ugu bilaabayna mudo aad la joogaysid cunuga xannaanada oo la qabsasho ah. Waxaa inna waydiin kartaa suaalaha aad qabtid, innoo sheegna waxa uu cunugaadu ubaahanyahay . Waxaa kaloo baranaysaa jawiga iyo goobta xannaanada sida aytahay, shaaqaalaha iyo carruurta kale oo cunugaadu xannanada la dhiganayo.

Inskolning

# Maalmaha la qabsashada xannanada

Xannanada waxaa isticmaalnaa maalmo uu waalidku la joogayo cunuga xannanada siduu ula qabsado bilaabida. Adiga ama qof kale oo cunuga sifiican u yaqaano ayaa goobta xannaanada la joogayo, sida aad u aragtaa qaab maalmeedka siduu yahay marka uu cunuga la qabsanayo xannanada. Muhiimad weyn ayaa uleedahay cunugaada maalmaha la qabsashada xannanada. Adiga waxaad utahay qofkii uu xasiloonida ku dareemayay anagana waa isbareynaa cunuga.

Cunugaada si xasiloon iyo degnaansho kujirto adigoo la joogo ayuu ula qabsanayaa jawiga cusub anaga macalimiinta ah iyo carruurta kale ee xannanada dhigato. Waxaa kale oo faham ka qaadan doonta qaabka waxbarashada, macalimiinta iyo guruubyada carrurta ee kale. Inta maalmood ay qaadanayso la qabsiga xannanada waxay ku xirantahay baahida cunugaada iyo sida uu ula qabsado. Waxaa ku xisaabtantaa qiyaastii mudo todobaad ah oo aad cunuga xannanada la joogaysid, xiliga uu la qabsanayo.

Waxaa ka shaqeynaynaa xiriir xasilooni leh mudada la qabsiga xannanada:

- Adiga yaa haynaya cunugaada mudo la qabsiga oo ka badalaya baambarka, dharka ugalinayaa kana bixinaya.
- Macalimiinta goobta ayay joogan wayna la hadlayaan cunuga markasta ay fursad u helaan.
- Labadiina ba waad nala joogaysaa xiliga cunuga la barayo xannanada, ilaa adiga iyo cunugaaduba ay ku dareemaan xasilooni joogida xannaanada. Cunuga lama baranayo in laga tagayo. Waxaa baraynaa inuu nala joogi annaga goobta xannanada.
- Waa isla qiimeynaynaa xiliga laga tagi cunnuga.

Måltiden – en del av lärandet

# Cuntada – Qeyb ka mid ah waxbarashada

Cuntada waa qeyb ka mid ah daryeelida iyo shaqada warbarida xannanada. Hadba xiliga uu joogu cunuga waxaa la siinayaa quraac, khudrad, qado iyo casariyo xiliyo go'aansan. Haddii cunugaadu ubaahanyahay cunto gaar ah uusan waxkasta cuni karin? Waxaa kusoo qoreysa waxa uu cuni karo cunugaada bogga internetka ee: www.harnosand.se




Förskolornas öppettider

## Wakhtiyada xannaanadu furantahay

Waxaa ugu horeyn furnaa 06:30, waaxana ugu danbeyn xirnaa 18:30 Xiliyada ay xannanada furantahay waxay ku beegantahay jadwalka caruurta la keeno, wayna kala duwantahay xiliyada baahiyada cauurta ee guruubyada kala duwan. Haddii aad ubaahantihiin inaad jadwalka badashaan xiliyo ka baxsan (06.30 – 18.30) waxaa ubaahantihiin inaad macalimiinta usheegtaan mudo 14 maalmo ka hor inta xiliga aan lagaarin. Haddii aad ubaahantihiin xannanada xiliyo kale waxaad ka codsanaysaan degmada qeybta habeenkii qaabilsan.

Waxaa kale oo kusoo qortaan bogga internetka ee xannanada isbedelka jadwalka.

Lämna och hämta

## keenida iyo wadida

- Keen oo wad xiliga jadwalka ku qoran. Waa muhiim inaad macalimiinta la hadasho markaa keenaysid cunuga iyo markaa wadaysid.
- Usheeg marwalba xannaanada haddii uu qof kale soo wadayo cunuga.

Lägg in barnets schema i lärplattformen

## Gali jadwalka cunuga bogga internetka



Bogga internetka ee xannanada waxaa ku soo qoreysaa marka cunugaadu maqanyahay iyo waxaa kale oo aad kahelaysaa warbixin ka timid xannanada.

Haddii loo baahdo maamulka iskuu waxuu warbixin ugu diri karaa bogga internetka ee xannanada dhamaan waalidiinta.

Haddii aad ubaahantihiin inaad jadwalka badashaan oo wakhtiyada ku darsataan, waxaa ubaahantihiin inaad la xiriirtaan macalimiinta xili hore inta aan wakhtiga lagaarin ugu yaraan 14 maalmood kahor.

Frånvarande

## Maqnaanshaha

Haddii cunugaadu maqnaanayo maalin waxaa ubaahanahay inaan ogaano ugu danbeyn 08.00 subaxnimo. Ku qor cunuga maqnaansho bogga internetka ee xannaanada haddii cunugaada guriga joogayo ama soo wac oo usheeg qeybta uu xannanada ka dhigto cunuga. Nasoo wargeli fadlan maalin kahor xiliga uu cunugaadu xannaanada kusoo laabanayo.

Maqnaashaha mudo bil ah ama ka badan ayadoon wax is afgarad ah jiran waxaa booskaas loo diwaan galinayaa inaad iska celiseen.

Föräldrainflytande

## Saamaynta waalidka

- Waxaa yeelanaynaa wadahadal ka hor maalmaha barida, wadahadal kadib mudada barida xannanada, iyo wadahadal xaga waxbarashada sanadkii hal mar.
- Waxaa wada kulan keena maalinlahaa isku arkeynaa markii aad cunuga keenaysid iyo markii aad wadaysid.
- Sanadkii hal mar ayaa qabanaa kulanka waalidiinta.
- Xannaanooyinka waxay leeyihiin gudiga walidiinta, halkaas oo aad kusoo gudbin kartid aragtidaada oo aadna wax ka badali kartid sida xannanada aytahay.
- Wada jir ayaa qiimeyn ku sameynaynaa luuqadaha uu cunugaadu la kulmo, qiimeynta waxaa dib u eegista ku sameynaynaa sanad walba.

Allmän förskola

## Xannaanada dadwaynaha

Xannaanada dadwaynaha waa lacag la'aan. Dhamaan carruurta xaq ayay uleeyihiin inay bilaaban xannanada laga bilaabo sanad dugsiyeedka dayrta uu buuxinayo 3 sano. Xiliyada joogida waa 8.30-13.30 talaado-khamiis laga reebo asbuucyada fasaxaa. Xannaanada dadwaynaha way xiranyihiin xiliyada fasaxa. Waxaa la soconaa xiliyada sanad dugsiyeedka dugsiga hoose, ka akhri www.harnosand.se



När kan ditt barn vara i förskolan?

## Goorma ayuu cunugaadu xannaanada aadayaa?

- Nidaamka kowaad ayaa ah haddii aad fasax tahay cunugaaduna waa fasax. Ma keeni kartid cunugaada xannaanada markii aad fasax kujirtid.

- Cunugaadu xaq ayuu u leeyahay inuu xannanada joogo xiliga aad shaqada ama iskuulka ku maqantahay.

- Hadii aad fasax walid  kujirtid ama Shaqo raadiye tahay ilmahaaga ilaa 15 sacadood ayuu ku dhigankaran xanaanada todobaadkii. 15 sacadoodkaan khidmad ma bixinesid laga bilaabo Sanad dugsiyeedka deyrta oo ilmaha 3 sano buuxsado. Ilmaha 1 ilaa 3 sano jira khidmad baa ka bixineysaa. Wakhtiyada xanaanada waa talaado ilaa khamiis 8:30 ilaa 13.30 lakiin wakhtiyada fasaxa kumjiraan. Waxaan raacnaa sanad dugisiyeedka  dugsigaa aasaasiga.

- Adiga fasaxa waalidka kujira ama shaqo raadiskaa waxaa dooran kartaa inaad lacag bixiso oo aad cunugaada xannaanada keentid xitaa xiliga fasaxa lagu jiro. Haddii cunugaadu udhaxeeyo 1 ilaa 3 sano waxaa bixinee lacag ka badan ka hor intaadan dooran xiliyada fasaxa. Codsigaada waxaa ka sameynee bogga internetka.    Wakhtiyada xiliga fasaxa lagu jiro waa talaado-khamiis 8.30-13.30.  Lakiin kuma jirto bisha julaayo.

- Haddii adiga fasaxa waalidka kujira ama shaqa raadiskaa aad doorato inaad lacag bixiso sidii aad 15 saacadood oo xiliga fasaxa cunugaada xannaanada ugeyso,ma keeni kartid cunuga xiliga aad fasaxa ku jirtid ama bisha julaayo. Haddii aad doorato in cunugaada uu xannaanado kuu joogo xiliga fasaxa ma badali kartid doorashadaada mudo 12 bilood kudahood ah, bil walbana warqad aad lacagta ku bixiso kuu imaanaysa.

- Haddii aad tahay magangalyodoon, xaq ayuu cunugaadu u leeyahay xannaanada dadwaynaha si lacag la'aan ah xiliyada aysan fasaxa aheyn. Laga bilaabo sanad dugsiyeedka dayrta uu cunugaadu gaarayo 3 sano, talaado ilaa khamiis 8.30-13.30.

Xannaanada waxay waalidka ka codsan kartaa cadeyn laga keeno shaqo bixiyaha, iskuulka ama ururka shaqaalaha haddii loo baahdo. Cunuga baahida gaarka leh ee la xariirta xaga hormarka waxbarasho iyo cunuga baahi gaar ah leh ee la xariirta xaalada qoyska waxaa xannaanada lasiinaya wakhtiyo baahida ku salaysan.

Planerings-och fortbildningsdagar

## Maalmaha qorsheynta- iyo aqoonkorarsiga

Sanadkii waxaa leenahay 4 maalmood oo ah qorsheyn iyo aqoonkorarsi sida uu shaqaaluhu fursad uguhelo si wadajir hormarin xirfadeed. Haddii aadan fursad uhaysan inaad fasax noqotid waa lagu siinaya wakhti xannaanada laakiin shaqaale ku meel gaar ah la keenayaa. Dhowr xannaanooyina waaa la isku dari karaa xiligaas. Haddii aad maalmahaas ubaahantahay boos xannanada waa inaad noo soo sheegta ugu yaraan 14 maalmood ka hor.

Vårdnadshavares semester och juli månad

## Xiliga waalidka fasaxa kujiro iyo bisha julaayo

Xiliyada fasaxa lagu jiro iyo dhowrka maalmood oo uu fasaxa soo galo waxaa la isku dari karaa dhowr xannaanooyin.

Marka waalidka uu fasaxyahay cunugana fasax ayuu ahaanayaa. Xiliyo kooban wala boodi karaa haddii maamulaha la isfargarto laakiin bisha julaayo suurtogal maahan. Xiliyada laga boodi karo is afgarad maamule kadib waa ugu badnaan 5 maalmo fasaxeed ah sanadkiiba iyo halkii waalidba.

Bisha julaayo waxaa xanaanada loo ogolyahay kali ah carruurta waalidiintooda ay shaqeeyaan ama waxbartaan. Asbuucyadaas waa inaad keentaa cadeyn inaad waxbarato ama aad shaqeysid. Waalidka shaqo raadiska ah ma diwaan galinayo cunugiisa bisha julaayo laakiin xaq ayuu uleeyahay booska horey lagasiiyo haddii uu shaqo helo ama waxbarasho bilaabayo.

Avgift

# Lacag

Bil walba waxaad bixinaysaa lacag. Lacagta aad bixinayso inta ay la egtahay waxay ku xirantahay dhaqaalaha kusoo galo, laakiin cadad go'an ayay ku egtahay. Haddii aadan soo gudbin dhaqaalaha kusoo galo waxaa bixinaysaa cadadka lacageed ee ugu badan.

Uppsägning

# Celinta booska

Soo gudbinta celinta booska waxaa soo shegaysaa labo bilood ka hor xiliga cunuga xannaanada ugu egtahay. Lacag ayaa bixinaysaa mudada labada bilood ah ee booska siideysay xitaa haddii uusan cunug kuu aadin xannanada. Carruurta fasalka kowaad ee xannaanada bilaabaya booskoodu waxuu ku egyahay 1 julaayo, haddii uusan waalidka rabin inuu booska ku ekaado xiligaas ka hor. Haddii aad ubaahantihiin daryeelka haynta caruurta kadib 1 julaayo waxaa codsaneysaan xannaanada xili firaaqada, kana codso bogga internetka ee degmada.

Sjukdomar

## Xannuunka

Xaalada caafimaad ee cunuga ayaa go'aaminaysa hadduu xannaanada imaanayo iyo inkale. Hawsha maalinleha ee xannaanada waybadan tahay cunugana waa inuu karaankiisa fiicanyahay wayna ka duwantahay markuu guriga joogo.



Cunuga markii xannaanada la keenayo waa inuu caafimaad qabo uuna awoodi karo joogida xannaanada.

Ciyaalka xannaanada jooga waxay la kulmaa ciyaalka kale oo saxiibadooda oo caafimaad qabo. Waa inaan iscaawino oo aynu faafin xannuunada.

Haddii cunuga uu xannuunsado asagoo xannaanada joogo, waa kusoo wacaynaa sidaa usoo wadid. Macalimiinta xannaanada ayaa go´aaminaya haddii uu cunugu caafimaad qabo oo uu maalintaas xannaanada joogi karo.

Magsjuka

## Calool xannuun

Cunuga waa inuu guriga jooga mudo 48 saacadood ah kadib markii lagu arkey calaamadii ugu danbeysay. Waxaa calaamadaha ka mid ah inuusan cunugu cuntada cunayn. Waxaa adinka rabnaa inuu cunuga guriga joogo haddii walaalihiis caloosha laga hayo.

Feber

## Qandho

Cunuga waa inuu guriga jooga ugu yaraan hal maalin uusan qandho laheyn intuusan xannaanada kusoo laaban.

Ögoninflammation

## Caabuqa isha

Cunuga waa inuu guriga jooga ilaa inta insha ay isku dhagdhagayso oo ay caabuqsantahay.

Medicin

## Daawo

Waxa dawo ah carruurta ma siino aan ka aheyn is afgarad dawo siin sida daawada neefta haddii si degdeg ah loo qabto cunuga.

Warbixin dheeri ah ka hel 1177.se

Kläder på förskolan

# Dharka xannaanada


Halkaan waxaa ku qoran dhar aan rabno inaad cunuga xannaanada ku keentaan sidii aan cunuga bannaanka ugu saari karno. Cunuga dharkiisa waa in magaciisa lagu qoro.

| Dayr iyo Gu’ | Jiilaal | Xagaa |
|---|---|---|
| Kabaha roobka | Kabaha barafka | Kabaha xili xagaaga |
| Koofiyad khafiif ah | Koofiyad adag | Koofiyad af dheer |
| Galoofyo khafiif ah | 2 galoofyo oo adag | Kabo caadi ah |
| Galoofyo safoon ah | Tabeebaha surka lagashto | Funaanada gacmo dheeri iyo mid gacmo gaab |
| Dharka dhogorta leh | Dharka barafka oo isku xiran | Kareemka qoraxda |
| Dharka dhoobka safoon | Sharbaadyaha dhaxanta | Dharka roobka |
| Surwaal roob korka gashi | Funaanad dhaxameed | Jaakad khafiif ah |
| Jaakad roob | | |

Cunugiina waxuu ubaahanyahay dhar dheeri ah oo xannaanada uyaalo

| | |
|---|---|
| 2 xabo | Funaanado gacmo dheer ah |
| 2 xabo | Funaanado gacmo gaab ah |
| 3 joog | Surwaalo |

| | |
|---|---|
| 3 joog | Sharabaadyo |
| 3 xabo | Buumayaal ama surwaal hoosgashi ah kuwa aan isticmaalin baambar |




Bra att veta

# Fiicantahay inaad ogaatid

- Ma ubaahnid inaad baambar cunugaada usoo qaadid. Xanaanada ayay yaalan baambar ku filan intuu cunuga xannanada joogo.
- Carruurta xannaanada ku qoran caymis shilalka ayay ku jiraan.
  Bogga intenetka ee degmada waxaa ku qoran warbixin quseyay caymiska shilalka.
- Sida uu cunuga bilaabida xannanada ay mid wanaagsan ugu noqoto waxaa loo baahanyahay inuu cunuga la qabsadey cunista cuntada adag ka hor bilowga xannanaada.
- Xannaanada waxaan fiiro gaar ah uyeelanaa una dabaal degnaa maalmaha dhalashooyinka, waxaa qaadna heeso iyo sheeko. Xiliga dabaal dega wax cunis kuma jirto.
- Waxaa isku deynaa inaa yareyno waxyaalaha macaanka laakiin marmar waxaa dhici karta inaa jalaato keeno xiliyada xafladaha. Usheeg macalimiinta haddii aadan rabin inuu cunugaado cuno waxyaalaha macaankaa.
- Ma ogalin in xannaanada la keeno waxyaalo macaan ama cunto guriga laga keenay.
- Xannanada looma ogola inay taalo cunto, doolshe ama waxyaabo kale oo ay kujiraan lows yicib, sisin ama waxyaalo kale oo laws leh sababtoo ah waxaa jiro dad xasaasiyad ku qabo.

Anmälningsskyldighet

## Waajibka wargelinta

Dhamaan shaqaalaha xannaanada waxaa saaran waajibka wargelin ee sharciga arrimaha bulshada cuntubka 14aad qodobkiisa 1aad. Taas oo macnaheedu tahay in shaqaalaha ay waajibta ku tahay gudbinta haddii ay dareemaan tuhun ama walwal quseeya in cunug uu halis kujiro. Waxaa loo yeelaya ka fikirida wanaaga cunuga iyo qoyskaba sidii ay u helaan caawinta ay ubaahanyihiin. Shaqaalaha xannaanada baarintaan kuma sameynayaa walwal intuu yahay ee waxaa hawshaas iskaleh xafiiska arrimaha bulshada.

Sekretess

## Xog xafidid

Xannanada xogta way xafidaa anagoo raacayna xeerka Shacbiga iyo qarsoonaanta cuntubkiisa 23aad, qodobka 1aad. Qof ka shaqeeya xannanada ma sheeqi karo xog quseysa shaqsi, haddii xogtaas ay ka shifayso macluumaadka shaqsi ama eheladiisa ayna dhibaato ukeenayso.

Aga – fysiskt/psykiskt våld är olagligt

## Garaacida – jir ahaan/maskixiyan waa sharci daro

In gacan qaad la sameeyo waa sharci daro. Haddii qoyska dhexdiisa ka dhacdana halis ayay aad usii tahay. Tusaale ahaan gacan qaad loo gaysto cunug, xaaska ama ninka ama qof la nooshahay. Gacan qaad waxaa noqon karo kala tuurid, haraati ama feer wajiga looga dhufto, Waxaa kale ee noqon karo in qof la cabsiiyo ama dareenkiisa la dhaawaco.

Styrdokumenten: Skollag och Läroplan (Lpfö-18)

## Dukumintiyada maamulka: Xeerka iskuulka iyo qorshaha waxbarashada (Lpfö-18)

Xeerka iskuulka waxuu nidaamiyaa xaquuda cunugu iyo waalidkiisa leeyihiin iyo waajibaadka saaran.

Qorshaha waxbarashada waxaa ku faahfaahsan qiimaha ay xannanadu leedahay iyo waxbarashada ay carruurta xaqa uleedahay mudada ay xannaanada dhiganayaan.

Dhamaan xannaanooyinka waxay raacayaan dukumintiyada maamulka. Xannaanada waa waxbarasho waalidka uu iskiis ugu dooran karo cunugiisa, ma ahan waajib. Carruurtu xaq ayay uleeyihiin waxbarashada xannaanada iyo inay helaan qof la joogo oo baahidooda daboola marka waalidka uu shaqeynayo ama iskuul ku maqanyahay.



**Adi iyo cunugaadaba qalbi furan kusoo dhawaada xannanada.**

*La kulan xiiso leh ayaa rajeynaynaa!*

Härnösands kommun